

Xeerka Wasiirka Maaliyadda

8 Maarso 1970, lamba. 50.

Gudbinta gunnooyinka Shaqaalaha Wakaaladaha Dawladda – Abuuridda Sanduuq Gaara ee loogu talagalay Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada

WASIIRKA MAALIYADDA

Marka uu arkay Xaashida koowaad ee Kacaankii 21 Oktoobar, lamba. 1;
Marka uu arkkay Dekereetada Baarlamaaniga ee 29 Disembar 1961, lamba. 2 oo ku saabsan Nidaamka Maamulka Xisaabaadka;

Marka uu arkay D.P.R. ee 17 Disembar 1962, lamba. 317, oo ku saabsan Nidaamka Maamulka Xisaabaadka Dawladda;

Marka uu arkay Xeerka 9 Febraayo 1970, lamba. 9 kuna saabsan baabi'inta laga soo bilaabo kowda Jannaayo gunnooyinkii u sugnaday shaqaalaha rayidka iyo askarta Dawladda iyo Wakaaladaha Dawladda si lacagaas loo qoondeeyo Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada Dalka;

Marka uu Tixgaliyay baahida loo qabo, sii wadidda ulajeeddada Xeerka si lagu soo ururuuriyosanduuq gaara oo u dhigma lacagata gunnooyinka shaqaalaha Wakaaladaha Dawladda;

Marka uu garowsaday in ay habboontahay in la dhiso si waafaqsan qod. 154 ee Nidaamka Xisaabaadka Dawladda, santuuq gaara oo loogu talagalay in lagu maalgaliyo mashaariicda horumarinta dhaqaalaha iyo bulshada;

WUXUU DEKEREETO KU SOO SAARAY

Qod. 1

1. Laga soo bilaabo 1 Jannaayo 1970, waxaa la dhisay si waafaqsan qod. 154 Nidaamka Xisaabaadka Dawladda, santuuq gaara oo ku yaalla Bangiga Qaranka Soomaaliya oo lagu magacaabo “Santuuqa gaarka ee Horumarinta Dhaqalaha iyo Bulshada” kaaso xilkiisu yahay in uu bixiyo kharashka Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada Dalka;
2. Xisaabaadka Sanduuqa gaarka waxaa lagu haynayaa Xisaabaadka Guud iyadoo lagu maamulayo isla habraaca baarista xisaabta u degsan miisaaniyadda.

Qod. 2

Soo gudbinta lacagaha waa in lagu sameeyaa shan nuqul oo kala gooniya, iyadoo ka horna laga soo hubinayo Waaxda Xisaabaadka Guud ee Dawladda.

Qod. 3

Dekereetadaan waa in loo gudbiyaa Hantidhowraha guud si uu u soo diiwaangeliyo.

Muqdisho 3 Maarso 1970.

Wasiirka Maaliyadda

Maxamed Yuusuf Weyrax

La hubiyay iyo La diiwaangeliyay – Diw. lamba. 1, bogga lamba. 43.

Muqdisho, 10 Maarso 1970.

Hantidhowraha Guud: **Mohamud Issa Salwe**